

# *Ragga Dumarku Darxumeeyeen*

## Xaashida Macluumaadka

Sannadihii 1999 iyo 2004, in ka badan nus malyuun ragga Canada ayaa la noolaa wehel dagaal ku haya. Waxaa dhici karta in uu wehelku ahaa xaas, ama xaas hore ama mid ula nool ninka si hab sharciyoobay. Taasi waxa ay macnaheedu tahay in ku dhow 6% oo rag ah in ay xidhiidh gaar ah la lahaayeen wehel darxumeeyey ama la dagaalsan.[1]

## *Haddaba waa maxay darxumeyntu?*

**Dhaqanka wax xakamaynta**

- Darxummada xidhiidhka gaarka ah waa dhaqan uu qof -ku xakameeyo wehelka la nool, ama yaraysto ama dulaysto qofka kale.
- Darxumeyntu dumarku ku hayaan ragga waxay dhacdaa marka wehelkeesu adeegsado xarfado ku dhisan maxkas, xoog, galmo ama xeelad cabsi galin. Gabadhu* waxay sidaa u sameysaa si ay u xakameyso ninka, kana hesho waxay doonayso ama u diido in uu ninku ka baxo xidhiidhka gaarka ah. Si uu uga badbaado darxumeyn kale, mar walba waxa uu ninku isku dayaa in uu badalo dhaqan kiisa si uu u raali geliyo wehelkiisa gaarka ah.
- Ujeedada ugu wayn ee darxumeyntu waa abuurida iyo ilaalinta awood iyo xukumida wehel. Wehelka la darxumeeyay waxa uu isku dayaa in uu diido xakameynta, gabadha darxumada wadaana waxa ay isku daydaa in ay mar labaad xakameynta ku sii adkeyso wehelkeeda.
- Darxummada xidhiidhka gaarka ah maaha dhacdo gaar ah. Darxummadu waxay dhacdaa wakhtiyo is daba socda. Haddii darxummada la ogolaado inay sii socoto, waxay noqotaa mid soo noqnoqota aadna halis u ah.

## Hababka xakameynta: affarta qeybood ee darxumeynta

Badanaa dadku waxay u qaataan darxumeyntu in ay la xidhiidho maskax, xoog, ama darxumo galmo. Hase ahaatee, darxumeynta waxaa ka mid ah hababka cabsigelinta.

**HABABKA CABSIGELINTA EE DARKEENKA** waxaa ka mid ah:

- Yasid
- Xakameyn dhaqaale
- Gooni u sooc wehel iyo xoriyadda ninka oo la koobo
- Darxumeyn diini ah ( ku maadsi ama aflagaadeyn ku saabsan diinta ama waxa uu wehelku aaminsanyahay)

**HABABKA DARXUMEYNTA JIDHKA** waxaa ka mid ah xanuun ama dhaawac loo geesto jidhka.

**HABABKA DARXUMEYNTA GALMADA** waxaa ka mid ah:

- Xoog ama cadaadis lagula kaco wehelka si uu u sameeyo galmo uusan rabin
- Ku maadsi ama wax xun- ka- sheeg hab galmeedka wehelka
- Diidnimo jacayl ama galmo si wehelka loogu ciqaabo marka uu jabiyo xuduudaha loo sameeyay

**HABABKA CABSIGELINTU** waa hadalo ama falal darxumeeyuhu uu isticmaalo si uu ugu cabsiiyo wehelkiisa. Tusaale: Burburin hanti, hanjabaad, daba galid ama xasaradeyn.

* Darxumeyntu waxay ka iman kartaa dumarka ama ragga. Qoraalkani waxa uu ka hadlayaa darxumada ragga, fiiri "Darxumaynta Dumarka ee Xidiidhka Gaarka ah". Xaashida ama buugamacluumaadka arrintaas waxa laga heli karaa **www.familyviolence.alberta.ca**.



Government of Alberta



# Aragtida Ummaddu way adkeyn kartaa darxumeynta

Hadda ayaa ummadeenu garatay oo daristay darxumeynta dumarku ku hayaan ragga. Aragtida iyo dabeecadaha ummadda aan saxda ahayn ee ku aadan ragga ayaa tani ka dhigtay darxumeynta mid qarsoon:

- Ragga ayay ahayd inay dumarka ilaaliyaan
- Dumarku ragga waxba kuma sameyn karaan
- Ragga kuma haboonaa in ay dumarka gacan saaraan marka dumarku wax u geystaan
- Raggu waa inay dumarkooda "xakameyn" karaan

Aragtiyooyinkaas kor ku xusan awgood, raggu way ka gaabsadaan in ay qirtaan darxumo ka timaada dumarka, waxaana dhici karta in raggu arrintaas aysan cidna u sheegin. Booliska iyo khubarada kale ee arrintaas ku lug leh waxaa laga yaabaa inay fududaystaan darxumeynta dumarku ku hayaan ragga. Sidaa darteed, nin dumar darxumeeyeen waxa uu muujin kara dareemadan soo socda:

- Ka cabsi in uu arrintaas qof kale u sheego
- Niyad jabama in la xaqiray
- Cabsi in uu muujin kari waayey galmadi nin ahaan laga filayey
- Jaha wareersan iyadoo mararka qaarkood wehelkiisu muujiso jacayl iyo naxariis
- Aaminsanaan in uu darxumeynta u qalmo

# Toban Arrimood **aad qaban karto haddii lagu darxumeeyey**

1. Marka hore, Hubi in adiga iyo caruurtaadu aad nabad gelyo ku sugantihiin**. Haddii add khatar deg deh ah ku sugantihiin, wac 911.**
2. Sameyso hab lagu badbaado. Haddii wehelkaa uu mar uun ahaa qof dagaals badan, waxaa dhici karta in uu mar kalena kula dagaalamo. Waxaad u baahantay hab lagu badbaado si, hadaad u baahatid aad u gaadhi karto meel aamin ah. Fiiri "Habka Badbaadada" Buuga " Darxummada Xidhiidhka Gaarka ah ee Ragga", laga helo **www.familyviolence.alberta.ca.**
3. Ogow in arrintan masuul aanad ka ahayn. Darxumeyntu waxaa ka masuul ah qof wada darxumenta.
4. Garo in darxumeyntu iyo dagaalku ay sii socon karaan iyada oo aan wax laga qaban.
5. Arrintan la socodsii qof aad ku kalsoon tahay. Dooro qof ku rumeysanaya. Aamusnaanto awood ayey siisaa darxumeynta. Ha is dhiibin.
6. Aqoon raadis bilow ku saabsan darxumeynta xidhiidhada. Keli ma tihid. Ilaa 6% ee ragga Canada ayaa soo gudbiyey in ay darxumo kala kulmeen weheladooda.[2]
7. Raadi wixii gargaar aad ka heli karto degaanka bulshadaada aad la nooshahay. Wac telefoonka 24-saac ee Khadka Macmuulaamadka Dagaalada Qoyska ee **310-1818** ama si aad u heshid warar faahfaahin ah booqo **www.familyviolence.alberta.ca.**
8. La kulan khabiir arrimahaas ku lug leh.
9. Naftaada daryeel. Waxaad ku sugan tahay wadci adag oo kaaga baahan awood iyo karti. Waqti gooso aad ku sameyso wax dareen fiican kugu abuura.
10. Waqti la qaado dad aan darxumo lagu sameyn. Haddii xitaa aysan toos wax kuu tari karin, wax ay ku xasuusin karaan in dadku badankiisu ku nool yihiin xidhiidh naxariis iyo xidhiidho wax tar leh. Xidhiidh kaas oo kalena adna waad samayn kartaa.

# Raadi Gargaar

**Haddii naftaadu ama qof aad garaneyso ku sugan yahay khatar deg deg ah, wac 911.** Si aad gargaar uga hesho bulshadaada aad la nooshahay, fadlan wac telefoonka 24-saac ee bilaashka ah ee Khadka Macmuulaadka Dagaalada Qoyska ee **310-1818** ama si aad u hesho warar faahfaahsan booqo **www.familyviolence.alberta.ca**. Adeegyada Caruurta iyo Dhalinyarada ee Alberta wax uu ku kalsoon yahay in uu horseed ka noqdo dadaalka Alberta ee ku saabsan Tirtiridda Dagaalka Qoyska iyo Xoog u Sheegashada.

[1] Tiro Koobka Canada (2006, Oktoobar). *Qiyaasidda Darxumeynta Dumarka: Tiro Koobka 2006* (Diiwaanka No. 85-570-XIE). Ottawa, ON: Qore. Laga keenay http://www.statcan.ca/english/research/85-570-XIE/85-570-XIE2006001.pdf
[2] la mid ah.

Faahfaahin arrintan ku saabsan, tix raac buugaku saabsan Darxumeynta Dumarku ku hayaan Ragga: lagana helo: **www.familyviolence.alberta.ca** ama wac telefoonka bilaashka ah ee Alberta **310-1818.**



Government of Alberta